

BSD Toddobaadle - May 17, 2021

Farxad & Hawlgelinta Dugsiga Hoose ee Cedar Mill

Macallinka Dugsiga Hoose ee Cedar Mill Abigail Frainey waxay isticmaashaa muusig si ay ugu billowdo subaxdii waxbarashada isku dhafan ee ardaydeeda. Bal u fiirso iyada iyo ardaydeeda oo qoob ka ciyaar ciyaaraya. <https://youtu.be/Msd-HNp0Z4c>

Ardayda Dugsiga Sare ee Beaverton Tartanka Farshaxanimada

Waxaan u hambalyeynayaa Dugsiga sare ee Beaverton Clara Johnson, oo loo magacaabay guuleystaha [2021 Congressional Art Competition for Oregon's First Congressional District](#). Farshaxankeeda waxaa cinwaan looga dhigay “*Xenophobia*.”

Laba arday oo kale oo ah galaaska 12aad oo ka tirsan Dugsiga Sare ee Beaverton ayaa la siiyay abaalmarino sharaf leh: Diane Choi iyo River Rain. [2021 Congressional Art Competition for Oregon's First Congressional District](#).

Cayaarsiinta Marka baska laga dagayo

U fiirso sida Maamulaha McKinley Aki Mori uu u maareeyo inuu hal mar laba meelood ka cayaaro asigoo ula jeedo inuu hormariyo isku xirka bulshada.

<https://youtu.be/DWP4ZKOyF8w>

Codso inaad u adeegto guddiga miisaaniyadda degmada

BSD waxaa ka bannaan jago ah Guddiga Miisaaniyadda waxayna raadineysaa musharixiin kala duwan oo dhammaystira xilligan, oo dhacaya Juun 30, 2022. Boosku wuxuu ku yaal aagga Guddiga Dugsiga 4. Dugsiyada Degmooyinka ee aaggan matalaya waa Aloha-Huber Park K-8 , Beaver Acres, Errol Hassell, Hazeldale, Kinnaman, Mountain View, Aloha iyo Iskuulka Caalamiga ee Beaverton (ISB). Aagagga Guddida Dugsiyadu gebi ahaanba isma waafaqsana aagagga xaadiritaanka dugsiga, markaa fadlan ka eeg khariidadaha aagga [District website](#).

Musharixiinta daneyneysa waa inay ku noolaadaan Aaga Gudiga Dugsiga ee ay matalaan, waa inuu noqdaa aqoonyahan u qalma degmada, wa inuu ku noolaa degmada hal sano mana noqon karaan shaqaale BSD ah. Xubnaha Guddiga Miisaaniyadda waxaa magacaaba Guddiga Dugsiga. Jagadu way furantahay ilaa la buuxiyo kuwa doonaya inay codsadaanna waa inay buuxiyaan [application](#) iyo ku lifaaq warqad sheegeysa inaad daneyneysid iyo / ama resume ah.

Doodle 4 Google

Waxaan hambalyo u dirayaa fasalka ardayadda fasalka 4-aad ee dugsiiga hoose ee Findley, Elise Then, oo ku guuleysatay sanadlaha [Doodle 4 Google contest](#) oo ah heer gobol. Elise waxay ku sharaxaysaa dooddeeda Nature's Strong-Fold sidan: "Doodlekan, waxaan doortay inaan matalo xoogga laga helo dabeecadda anigoo adeegsanaya origami Tusaale ahaan, hummingbirds, shimbiraha ugu yar adduunka, waxay garaaci karaan baalashooda 40 jeer halkii ilbiriqsiiba! Dabeecaddu waa hadiyad halka aan ka helo xooggayga. Waa inaan qadariyo oo aan daryeelo."

Google waxay ku casuuntay dadweynaha inay u codeeyaan Doodle ay ugu jecel yihiin 54-ka dowlad-goboleed iyo dhulka hoos yimaada si loo go'aamiyo ardayda ku guuleysatay inay ka mid noqdaan shanta ugu horreeyso. Doodle-ka guuleystaha waddanka ayaa lagu soo bandhigi doonaa bogga Google maalin.

La Primavera con Familia y Amigos oo ku taal Vose Elementary

La Primavera con Familia y Amigos waa xaflad bulsho oo ka dhacda Dugsiiga Hoose ee Vose, oo lagu qabto iskaashiga THPRD. Fiiri waxqabadyada sanadkan <https://youtu.be/x4cHL677n2I>

Magaalada Beaverton Bandhigga Mashruuca Ikhtiyaariyada Guriyeynta ee

Arbaco, May 26 | 6 - 7 pm

Magaalada Beaverton waxay dooneysaa inay bixiso xulasho guriyeed si ay u daboosho baahiyaha kaladuwan ee dadka ku nool Beaverton ama doonaya inay ku noolaadaan Beaverton. Sharciga cusub ee gobolka wuxuu u baahan yahay in magaalooyinku ay tixgeliyaan ikhtiyaarro badan oo xaafadaha ah oo hal guri oo keliya halkii jeerba hadda loo oggol yahay. Mashruuca Ikhtiyaariyada Guriyeynta ayaa go'aamin doona meesha iyo sida noocyada guryaha ee dheeraadka ah - oo ay ku jiraan unugyada guryaha lagu rakibo, laba-dhismayaasha, saddex-dhismayaasha, afar-dhismayaash, lix-dhismayaasha, guryaha isku dhaggan, aqallada taxan iyo guryaha yar-yar - ayaa loo oggolaan doonaa aagagga la deggan yahay ee Beaverton. Wax dheeri ah ka ogow kulankaan qadka ah iyo booqashada www.BeavertonOregon.gov/HOP.

Kooxda Hawlaha Cimilada

Magaalada Beaverton waxay sameyneysaa Guddi Hawleedka Cimilada si kor loogu qaado wacyiga Golaha Magaalada ee aragtiyada bulshada ee ku aaddan isbeddelka cimilada. Codsiyada waxaa la qabanayaa ugu dambeyn Maajo 23. Xubnaha bulshada ee xiisaynaya ayaa booqan kara [website](#) ka dagmaga si ay u codsadaan. Dhaqaale ayaa loo fidin doonaa xubnaha kaqeybgalka kulanka. Codadka bulshooyinka laga tirada badan yahay iyo kuwa nugul ayaa mudnaan la siin doonaa waxaana lagu

dhiirigelinayaa inay codsadaan, sidoo kale xubnaha bulshada ee ka yar da'da 30.
Xubnaha waxaa loo magacaabi doonaa illaa iyo muddo saddex sano ah, laga bilaabo
Julaay 2021.